



(Dambiyad waawayni waa: Ilaahay loo shariik yeelo, waalid caasiga, naf la dilo iyo dhhaar badanaha)

Cabdullaahi Camar Binu Caas Allaah ka raali ahaade wuxuu Nabiga scw ka wariyey inuu yiri: (Dambiyad waawayni waa: Ilaahay loo shariik yeelo, waalid caasiga, naf la dilo iyo dhhaar badanaha).

[Xadiis Saxiix ah.] [Waxa wariyay Albukhaari.]

Nabigu scw wuxuu cadeeyey dambiyada waawyn, waana kuwa loo balan qaaday cida samaysa ciqaab adag oo aduunyada iyo aakhiraba ah. Tan koowaad: Ilaahay oo loo shariig yeelo: waana cibaadada noocay doontaba ha ahaate oo loo leexiyo cid aan Ilaahay ahayn, iyo Isaga oo lala simo wax aan Isaga ahayn wax yaabaha uu keligii xaq mudan yahay sida Ilaahnimadiisa, Rabinimadiisa, magacyadiisa iyo tilmaamihiisa wanaagsan. Tan labaad: waa waalid caasiga: waana wax kasta oo labada waalid dhib ku ah, oo ah hadal ama ficol, iyo u samafal kooda oo laga tago. Tan saddexaad waa naf la dilo: taasoo ah xaq daro, sida dilka dulmiga iyo cadaawada ah. Tan afraad, waa dhaar badanaha: waa mida lagu dhaaranayo beenta loo bareerayo, waxaana sidaa loogu magacaabay, waayo dhaar badanaha waxay quusinaysaa dambi ama naar.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3044>

